

Sharciyada iyo xeerarka cusub ee wajiga saddexaad oo dhaqangalaya Axada 20.06.20212 laga bilaabo saacada 12.00 ee duhurnimo

Talooyinkan xasuu snow kala fogaanshaha , gacmo nadiif ah , gurigana joog haddii aad xanuunsantahay .

1.Xidhiidhka bulshada

- Lama ogola booqasho wixii ka badan 20 qof
- Caruurta xannaanooyinka wada dhigta ama isku dugsiga ah way ka badan karaan martida la oggolyahay inkastoo marwalba lagu talinayo tirada la ogolyahey
- Waxaana fiican in lagu kulmo bannaanka
- Booqashooyinka lama tirinayo kuwa xanuunka aanan qaadeyn (ilaashan ama tallaalan) oo ma khuseyso tirada xaddidan iyo kala fogaanshuhu laakiin waa in la ilaaliyaa kuwa qaadaya oo laga fogaado

2. Safarka (dhoofka

- Safarada guddaha ee wadanka guddihiisa waa la oggol yahay laakiin dadka aanan tallaalneyn waa in si dheeraad ah u foojignaadaan oo ay is ilaaliyaan oo iska jiraan meelaha uu ku badan yahay xanuunku .
- Dadka u safraya degmooyinka sharciyada fudud waa iney raacaan sharciyada iyo xeerarka degmooyinka ay asal ahaan kasoo jeedaan arintaasi waxay khuseysaa dadka aanan tallaalneyn.

3. Dugsiyada iyo xannaanooyinka

caruurta waxay raacayaan shuruucda taraafikada midabyada casaan, huruud, doog dugsi kasta iyo xannaano kastana waxay raaceysaa qiimeynta degmooyinkooda waxayna maamulada kala duwan ee degmooyinku soo rogi karaan xeerar u gaar ha degmo kasta si looga hortago faafista xanuunaka karoonaha

4.Waxbarashada sare

- Way furanyihiin kulamada waxbarasho iyo baadhis joogta ah
- Is diiwaangalinta ardeyda iyo kuraasta ay fadhiyaan si ay u fududaato helista qofkii qaadey

5. Shaqooyinka

- Waa la oggolyahay in lagu shaqeeyo goobaha shaqada sidoo kale Xafiisyada Guryaha lagu shaqeeyo waa lasii wadi karaa qofkii ay u suurogaltahay ama waqtiyo kala duwan in la shaqeeyo. Ama la isku wado shaqada guriga iyo goobta shaqada waxaana saaran dadyowga loo shaqooyo xil ka hortaga faafista xanuunka iyo xeerarka guud ee khuseeya
- Goobaha shaqada waa inay suurogaltahey kala fogaanshaha hal mitir

Dadka ilaashan (talaalan ama u uku dhacey karoone lixdii bilood ee ugu dambeysey) ma khuseeyo xeerka kala fogaanshuhu laakiin waa in la ilaaliyaa dadka jilicsan ee u nugul xanuunka

6. xafladaha iyo isku imaatinka mid guud iyo mid gaar ahba

Waxaa lagu talinayaa in lagu qabto dibaddaha
Dadka aanan tallaalneyn ama ilaashaneyn waa ineyna kasoo qayb galin xafladaha iyo kuwa meelo xanuunku ku badanyahay ka yimidey ama degmooyinkoodu ku jiraan shuruucda covid-19 sida xeerka 5A ilaa 5C

7. Isboortiga iyo dhaqanka waqtiyada fasaxa ah

- Waxaa lagu talinayaa si guud in lagu ciyaaro bannaanka
- Dadka waaweyn ilaa 30 qof way ku ciyaari karaan ciyaaraha lasoo qabanqaabiyo ee guddaha sidoo kale banaanka ilaa 40 qof ugu badnaan.
- Waxaa laga dhaafey xeerkaa ahaa ilaalinta kalafogaanshaha maadaama ciyaartu ayna suurogal aheyn haddii lakala fogaado.

8. Ciyaaraha xagaaga iyo dhoof wadareedka

Waxaa la oggolyahay ugu badnaan 300 oo qof oo kooxo loo qaybiyo ka kooban 40 qof kooxdiiiba .

Maaha qasab in la kala fogaado hal mitir laakiin talooyinka guud ee caafimaadku waa muhiim marwalba kala fogaanshaha, gacmo nadiif ah xerada lagu kulmayo dhamaan dadka qof weyn iyo caruur intaba .

Haddii ay ciyaartu suurogal aheyn iyadoon la isku dhawaan waxaa la laaley talooyinka kala fogaanshaha

9. Isboortiga xirfadleyda

Ciyaaraha xirfadleyda isboortiga waa la oggol yahay guddaha iyo dibadaba sidii caadiga aheyd. Taa macneheedu waa in lagu qaban karo tartannada iyo koobabka guddaha hoolasha iyo dibaddaba ama banaanka furan

Shuruucda wadankoo dhan khuseysaa

10 . Ganacsiga

Goobaha ganacsigu waa furanyihiin iyadoo la ilaalilnayo shuruucda ka hor tagga faafista xanuunka .

Waxaana saaran iney sameeyaan qaab iyo dhaqan looga hawlgalo shuruucda guud ee khuseysa iyo nidaaminta kala fogaanshaha iyo nadaafada

11 .Ispoortiga iyo waqtivadda fasaxa

- Caruurta iyo dhalinyarta ka yar 20 sano way ka qayb gali karaan tartannada kala duwan iyo isku imaatinada isboortiga ah ee ka dhacaya degmooyinka ama gobolada kala duwan ee Norway iyadoonan lakala fogaan guddaha iyo bannaankaba .
- Waxaa la oggolyahay dhamaan ka qaybgalka fanka sida ciyaar dhaqameedka jaaska heesaha farshaxanka tiyaatarada ee aanan aheyn xirfadleyda inay ku tabo bartaan guddaha iyo dibaddaba mana khuseyo xeerka kala fogaanshuh halka mitir wayna iskaga gudbi karaan gobolada wadanka

12 Xafladaha iyo isku imaatinka qorsheysan ee gaarka ah

- Waxaa lagu dhiirigalinayaa foajignanta iyo qorsheyn fiican dhamaan xafladaha iyo isku imaatinka si looga fogaado faafista xanuunkan.
- Iska ilaali inaad ka qayb gasho xaflad degmo kale haddii degmadaada xanuunku ku badan yahay gaar ahaa dadka aan la talaalin
- Waxaa la ogol yahey ilaa 100 qof isku imaatinka goobaha guud ahaan sida hoolalka la kireysto gudo iyo dibadba
- Xafladaha lagu qabto hoolalka kuraasta leh ama meelo gaar ah oo loo asteeyey kasoo qaybgalaha waxaa la oggolyahay ilaa 1000 qof oo labo qaybood loo qaybiyo min 500 oo qof haddii banaanka lagu qabanayana ilaa 2000 oo qof oo afar qaybood loo qaybiyo min 500 .
- Xafladaha aan lahayn kuraas ama meelo gaar ah oo loo asteeyey kasoo qaybgalaha ilaa 400 oo qof ayaa la oggol yahay oo labo qaybood loo qaybiyo min 200 oo qof haddii dibadda ama bannaanka lagu qabanayona ilaa 800 oo qof oo afar qaybood loo kala qaybiyo .
- Baadhis iyo caddeyn shahaadada karoona haddii qabanqaabada ay ku jirto laguna qabanayo guddaha oo meelo gaar ah loo asteeyey kasoo qaybgalayaasha waxaa la oggol yahay kala badh hoolku intuu qaado oo ah 50% ugu badnaan 2500 oo qof oo loo qaybiyo shan qaybood min 500 oo qof haddii banaanka lagu qabtona kala badh meeshu intay qaado oo u dhiganta 50% ugu badnaan 5000 oo qof oo loo qaybiyanayo toban kooxood ama qaybood oo ah min 500 oo qof .
- Haddii aaney xafladdu lahayn kuraasi ama meelo gaar ha oo loo asteeyey kasoo qaybgalaha waxaa la oggol yahay kala badh meeshu intay qaadi karto ugu badnaan 1000 qof oo loo qaybiyo min 500 oo qof haddii dibadda lagu qabanayana sidoo kale kala badh meeshu intey qaado ugu badnaan 2000 oo qof oo loo qaybiyo afar qaybood oo min 500 oo qof ah

13. Adeega caweyska iyo xafladaha habeenkii

- Lama soo gali karo meelaha lagu caweeyo habeenkii wixii ka dambeeya saacaddu markey tahay 24:00 habeenimo .

- Waa loo adeegi karaa macmiilka gudaha ku jira meelaha lagu caweeyo habeenkii wixii ka dambeeya saacada 24:00 gaar ahaan cabitaanka .
- Waxaa saaran ganacsatada makhaayadaha iyo meelaha lagu caweeyo ilaalinta shucuucda iyo xeerarka koronaha diiwaan galin, kala fogaansho gudo iyo dibadba

Qeexis

Qofka tallaalan waa

- Qofka qatey labo jeer tallaalka koroonaha ooh al usbuuc kasoo wareegey markii uu qatey kii ugu dambeeyey
- Qofka qatey tallaalka kaliya halm ar oo karoona ah kanasoo wareegtey sadex todobaad markii uu qatey ka dib
- Qof uu xanuunku ku dhacey covid-19 oo tallaalkana qatey todobaad ka dib . Ma qaadan karo qofku tallaalka ka hor sadex todobaad markuu ku dhacey xanuunku ka dib sidaa awgeed waxaa qasab ah in sadex todobaad kasoo wareegto xanuunka ka dib .
- Qofka tallaalka qatey oo sadex todobaad ka dibna laga helay xanuunka qofkaasi marka uu dhameysto muddada takoorka waa qof tallaalan

Dadka ilaashan ee aanan qaadeyn xanuunku waa :

dadka ilaashan waxaa loo jeedaa dadka si buuxda loo tallaaley ama hal tallaalka kaliya qatey sadex todobaad kadib ama uu ku dhacey xanuunku lixdii bilood ee ugu dambeeyey